# Xuquuqda Shaqada:Dhibnayaasha Rabshadaha iyo Qashqashaadda

Job Rights: Victims of Violence and Harassment

## Shaqada fasax ma ka qaadan karaa iyadoo sababtu tahay dagaal ama khashkhashaad?

Haddii adiga ama qof qoyskaaga ka mid ah lagu xadgudbo ama la faduuliyo ama haddii adiga ama qof aad kuugu dhow oo qoyskaaga ka mid ah uu yahay dhibane dambi dhacay, waxaad shaqada ka qaadan kartaa waqti fasax ah:

- Si aad u hesho amarka kala badbaadinta (OFP), ama amarka Kala Fogeynta (HRO). Fiiri xogta urursan *Amarka Amaan Helida iyo Amarka Khashkhashaada*.
- Ina aad ka qeyb qaadato dhegaysiga maxkamadda
- In aad ka markhaati noqoto dambi dhacay, haddii lagu weydiisto in goobta maxkamada aad markhaati furto.



Loo shaqeeyaha kuma ruqsayn karo, kuma handadi karo, kugulama kici karo wax heybsooc ah noocay doonto ha ahaatee, sabatoo ah fasaxa waxaad u qaadatay wax macquul ah si aad u hesho amar kala badbaadin (OFP) iyo amak kala foeynta (HRO). Loo shaqeeyuhu kuma ciqaabi karo asagoo hoos u dhigaya mushahaarkaaga, ama shaqadaada wax ka bedelaya, sababtoo ah ma jecla in aad fasax qaadatid.

Loo shaqeeyaha waa in uu ku siiyaa waqti fasax ah, laakiin kuma khasbana fasax lacag kuu socoto.

Laakiin, haddii aad haysato Waqtiga Fasaxa Jiradda iyo Amaanka ee Minnesota, waa aad isticmaali kartaa.

## Minnesota waxa la Kasbadaa Waqti Jiro ama Amaanku

Waqtiga Jiradda iyo Amaanka ee la Kasbadaa waa fasax lacagtu kuu socoto oo ay shaqaddu khasab ay ku tahay inay ku siiso. Waa khasab in lacagtaaga caadiga ah ee aad ku shaqeyso aad hesho. Fasaxan lacagtu socoto waxa uu dhici karaa haddii:

- aad jirato
- aad u baahan tahay inaad daryeesho qof xigta ah oo xanuunsanaya

Waxa aad kasban 1-saac oo waqtiga xanuun ku maqnaanta ah 30 kii saacadood ee aad shaqeysaba. Waxa aad kasban kartaa ilaa iyo 48-saac sannad walba ama ka badan haddii shaqadaaddu ay rabto. Haddii magaaladda aad ka shaqeysaa ay leedahay sharciyo ilaalin ah oo kale, shaqaddu waa khasab in ay u hogaansanto sharciyadaa.

## Xaq ma leeyahay Fasaxa Jiradda iyo Amaanka La Kasbado ee Lacagtu kuu soconaysa ee Minnesota?

Xaq ayaad u leedahay fasaxa jiradda iyo amaanka ee lacagtu kuu soconayso haddii:

- Aad ugu yaraan 80-saac u shaqeysay qolo shaqo oo reer Minnesota ah aadana
- Aadan ahayn qandaraasle madax-banaan.

Xaq ayaad u leedahay fasaxaa xataa haddii aad tahay shaqaale ku meelgaar ah ama saacado yar shaqeeya. Fasaxan waxaa dhici karta in laga saamaxo heshiiska gorgortanka ee shaqaalaha iyo shaqadda ee shaqaalaha saraha iyo dhismaha.

## Sidee ugu sheegaa loo shaqeeyaha (cidda aan u shaqeeyo) in aan maqnaan doono?

Haddi aad awoodid, wargeli loo shaqeeyaha ugu yaraan 48 saacadood oo ogysiin ah ka hor inta aadan shaqada ka maqnaan. Haddii aysan suura gal ahayn oo sugitaanku ay adiga iyo caruurtaada dhibaato u keenayso, markaas looma baahna in aad ogaysiin siiso. Loo shaqeeyahaagu wuxuu ku weydiin karaa caddayn waxa aad ku maqnayd, iyo waxa aad samaynaysay, laakiin waa in ay macluumaadkaas ay ka dhigaan qarsoodi ( khaas ah).

## Mushahar ma la i siinaya haddii aan shaqada ka maqnaado?

Haddii aad ka shaqaysid Minneapolis ama St. Paul oo loo shaqeeyahaaga ay u shaqeeyaan wax ka badan 6 qof oo shaqaale ah, waxaa lagu siinayaa fasax ku maqnaansho bukaan iyo sharciga maqnaanshaha nabadgelyada. Waxaad maqnaanshahaas u isticmaali kartaa in aad ku doonato gargaar xagga fulinta sharciga, in aad hesho la talin, iyo adeegyada kale ee la xiriira xadgudubyada qoyska ka dhex dhaca, ama galmoodka khasabka ah, ama dhib kaaga timid daba gal lagugu faduulinayo adiga ama qof qoyska ka mid ah oo aadan sheegayn.

Haddii aadan ka shaqayn Minneapolis ama St. Paul, sharrciga Minnesota wuxuu qabaa in loo shaqeeyuhu u ogolaado in shaqaalaha ay isticmaalaan fasaxooda kaydka u ah si ay u raadsadaan mucaawino xagga fulinta sharciga, u helaan la talin, iyo adeegyada kale ee la xiriira xadgudubyada qoyska ka dhex dhaca, ama galmoodka khasabka ah, ama dhib kaaga timi daba gal lagugu faduulinayo adiga ama qof qoyska ka mid ah oo aadan sheegayn. Sharcigaan ayaa ku daboolaya haddii aad shaqada haysay ugu yaraan 12 bilood oo aad ugu yaraan shaqaynaysay waqtiga barkiis.



Xubnaha qoyska ee sharcigaani daboolayo waxaa ka mid ah caruurta, xaaska, walaalaha, waalidka, soddogga ama sodohda, ilmaha awoowe ama ayeeyo loo yahay, iyo adeeraa hooyo/aayadaa.

Haddii aan loo shaqeeyuhu lahayn nidaamka mushahaar bixinta bukaan ku maqnaansho, kuma aha waajib in ay ku siiyaan mushahaar inta aad maqnayd. Laakiin haddii aad tahay dhibane dambi, waxaa laga yaabaa in aad mucaawimo ka heshid Guddiga Minnesota ee Magdhowga dhibanayaasha Dambiga.

### Barnaamijka u Cawil-celinta Dhibanayaasha Dambiyada ee Minnesota

Waxa aad codsan kartaa caawinaad haddii ugu yaraan ay kaa baaqatay mushahar le'eg $50 ay sabab u tahay xaaladaan kugu dhacday. Tan waxaa ku jira mushaharka kaa baaqday. Si aad u codsato, waa in aad ku wargelisay booliska 30 maalmood gudohood marka ay wax dheceen, waa in aad la shaqaysaa baaritaanka iyo dambi ku oogidda , waana in aad xeraysaa dacwad 3 sanno gudohood.

Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan magdhowga ama foomamka codsiyada, la xiriir:

Minnesota Crime Victims Reimbursement Program
*(Guddiga Magdhowga dhibanayaasha Dambi ee Minnesota)*
Office of Justice Programs, Minnesota Department of Public Safety
445 Minnesota Street, Suite 2300
St. Paul, MN 55101-1515

1 (888) 622-8799 or (651) 201-7300
https://dps.mn.gov/divisions/ojp/help-for-crime-victims/Pages/crime-victims-reimbursements.aspx

## Maxaan sameeyaa haddii loo shaqeeyaha uu shaqada iga eryo?

La xiriir gar yaqaan kaaga. Loo shaqeeyahaagu wuxuu la kulmi karaa ciqaab dambiyeed, haddii uu shaqada kaaga eryay ama kuu ciaabay sabab la xiriirta xaaladda ku qabsatay. Waxaa kuu suurtoobi karata in aad dacweyso loo shaqeeyaha si aad u hesho mushahaarkii kaa baaqday, wixii waxyeelo ah ee ku gaaray, iyo in shaqadaadi lagugu celiyo. Waxaa kaloo suurta gal ah in loo shaqeeyuhu uu bixiyo khrajka garyaqaanka.

## Ma heli cemiska dadka shaqo la'aanta ah haddii aan shaqadayda uga tego dagaalka qoyska dhex mara ?

Haa. Waad heli kartaa lacagta dadka shaqo la'aantu ku dhacday haddii aad rabtid in aad shaqada uga tagtid sababo la xiriira rabshadaha dagaalka leh ee qoyska ka dhex dhaca, xadgudubka galmoodka ama qashqashaad laguu geystay ama qof aad kuugu dhow oo qoyskaaga ka mid ah. "Qof aad kuugu dhow oo qoyskaaga ka mid ah," waxaa ku jira labada isu dhaxda, waalidka, adeerka/aayada, awoowe/ayeeyo, wiilkaaga, gabadhaada, wiilka adeerka hooyo, gabadha adeer hooyo, wiilka ama gabadha aad awoowe ama ayeeyo u tahay.

Haddii aad u baahan tahay caddayn in ay kugu timid rabshado dagaal wata oo qoyska ka dhex dhacday, galmo Khasab ah, ama daba gal. Caddayntaas waxaa ka mid noqon kara:

- Amar maxkamadeed ee kala badbaadin ama xakamyn faduul(OFP ama HRO)
- Warbixinta booliska ee caddaynaysa xadgudubka
- Caddayn in qofka xadgudubka ku kacay lagu xukumay xadgudubka.
- Dukumeenti caafimaad oo caddaynaya xadgudubka
- Warbixin qoraal ah oo uu bixiyay shaqaalaha bulshada, qof ka mid ah wadaadada diinta, qof ka shaqeeya hoyga dadweynaha, garyaqaan, ama qof xirfadle ah oo ku caawimay. Warbixintu waa in ay sheegaysaa in adiga ama qof ka mid ah qoyskaaga in uu dhibame u yahay rabshado dagaal wata ee qoys ka dhex dhacay , galmo Khasab ah, iyo daba gal.



***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**